iUpdate-ka xaashida ah– Iskuulka Hoose 2019-20

- **Fadlan si TOOS AH uga soo buuxi iUpdate-ka haddii aad helayso internet. Tilmaantu waxay ka bilaabanaysaa bogga xiga**
- **Fadlan ha buuxin foomkan haddii uu mas'uul ka tirsan qoyskaaga uu mar hore uga soo buuxiyay iUpdate-ka internet-ka**

Waxaa Faylkan qayb ka a foomka barnaamijka Extended Day Learning (EDL).

Sharciga Protection of Pupil Rights Amendment (PPRA)
OGEYSIISKA DIIDMADA KA QAYB-QAADASHA BARNAAMIJYADA ISKUULKA QAARKOOD
(OPT-OUT NOTICE FOR SPECIFIC SCHOOL ACTIVITIES)

Sharciga Protection of Pupil Rights Amendment (PPRA), 20 U.S.C. § 1232h, ayaa wuxuu ka dalbanayaa **Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul** in ay ku war-galiyaan waalidiinta/masuulyiinta in ay ilmahooda ka reebi karaan ka-qayb-galka barnaamijyada iskuulka qaarkood. **Waxyaabaha ay waalidiintu ka reebi karaan ilmahooda waxaa ka mid ah ra'yi uruurinta ka kooban mid ama in ka badan mowduucyadan soo socda.**

1. Fikirka siyaasadeed ee ardayga ama tan waalidkii;
2. Xanuunka ama dhibaatooyinka xaga dhimirka ah ee ardayga ama qoyskiisa;
3. Hab-dhaqanka la xiriira galmada;
4. Waxyaabaha sharci darrada ah, dambiga ah ama falalka soo shaac bixinaya ardayga ama qoyskiisa;
5. Macluumaadka xasaasiga ah ee la xiriira xubnaha qoyska, sida hooyo, walaal, iyo wixii la mid ah.
6. Macluumaadka la xiriira dadka uu ardaygu laleeyahay xiriirka dhow ee dhinaca sharciga ama macluumaadka kale ee gaarka ah, sida abukaate, dhakhtar iyo wixii la mid ah.
7. Dhaqanka diinta, iyo waxa uu ardaygu ama qoyskiisu aaminsanyihiin ee dhinaca diinta ah.
8. Macluumaadka la xiriira dakhliga (marka laga reebo inta uu sharcigu oggolyahay oo lagu qiimeeyo ka qayb-galka barnaamijyada iyo in ardaygu u qalmo kaalmo/caawin).

Sharciga Protection of Pupil Rights Amendment (PPRA) wuxuu sidoo kale khuseeyaa aruurinta, wadaagga, ama isticmaalka macluumaadka ardayda oo loo adeegsado nidaamyo la xiriira horumarinta ama baaritaanada caafimaad qaarkood.

Iyadoo kala tashatay waalidiinta, SPPS waxay qaadatay sharciga *521.00 – Student Surveys* si loo qeexo xuquuqda ardayda iyo qoysaska. Nidaamyada la xiriira sharciga *521.00* .1 wuxuu sidoo kale taageerayaa dhaqan-galinta nidaamkan. Labadan dukumiintiba waxaa laga heli karaa bartan: http://www.spps.org/Domain/11425

Barnaamijyada soo socda waxay u baahanyihiin in waalidka la ogeysiiyo iyo waliba in ay xaq u leeyihiin in ay ka joojin karaan ilmahoodu inay ka qayb-galaan. (Fadlan ogow ogeysiiskan diidmada ka qaybqaadashada wuu ka wareegayaa waalidka marka uu ardaygu gaaro 18 jir. Wuxuu sidoo kale khuseeyaa arday kasta oo ka yar 18 jir oo loo aqoonsaday inuu yahay qaan-qaadh dhinaca sharciga (emancipated minor).

MA JIRAAN HAWLO LA QORSHEEYAY
Ma jiro sahan/qorshe u qalma, u isticmaalidda macluumaadka ardayda waxyaabo la xiriira horumarinta, ama baaritaano caafimaad oo iyagu hadda qorshaysan.

Haddii la qoondeeyo in ardaydu ka qayb-qaataan barnaamij dabayaaqada sanadaka, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waxaa la siinayaa fursad ay kaga saarayaan ardaydooda ka-qayb-galka barnaamijka.

Warbixinta guud ee iUpdate-ka Dayrta (Waraaqaha Ku-noqoshada Iskuulka):

Ma xiiseyneysaa in ardaygaagu ka qaybgalo barnaamijka Extended Day Learning? Fadlan soo celi iUpdate-ka sida ugu dhakhsaha badan. Arrintani waxay caawineysaa in qorshaha iskuulku ee barnaamijka EDL.

Waalidiinta ama dadka masuulka ka ah qoysaska waa inay soo buuxiyaan (Back-to-School iUpdate online) iyadoo la isticmaalayo barta Portal Camp Portal inta u dhexeysa 16-ka Luuliyo iyo Sebteembar 9. Isticmaal magacaaga (One Stop Stop) iyo qoraalkaaga sirta ah (password) si aad u gasho barta Campus Portal adigoo booqanaya spps.org/onestop. Haddii aadan haysanin internet, fadlan u soo buuxi faylkan arday kasta oo ka tirsan qoyskaaga, kaddibna ku soo celi iskuulka ilmahaaga.

Fadlan ha buuxin foomkan haddii aad mar hore uga soo buuxiyay iUpdate-ka internet-ka.

- Soo buuxi **Faylkan iUpdate-ka** oo ku soo celi foomkan kaliya haddii aad uu isbaddalay cinwaanka gurigaaga ama macluumaadka xiriirka ee xaaladaha degdega ah. Kaliya hal foom ayaa loo baahan yahay qoys kasta waxaana lagu celin karaa mid ka mid ah iskuulada ardaygaaga

MUHIIM: Magacaaga (One Stop Stop) iyo qoraalkaaga sirta ah (password) ayaad u baahantahay si aad internet-ka uga buuxioso iUpdate-ka.

Waxa aad u baahantahay inaad samayso

Booqo barta Campus Portal ood ka gali karto spps.org/onestop adigoo isticmaalaya magacaaga (One Stop Stop) iyo qoraalkaaga sirta ah



- Guji/riix badhanka Campus Portal & iUpdate.
- Guji/riix badhanka Login.
- Gali magacaaga (One Stop Stop) iyo qoraalkaaga sirta ah (password).

Markaad guda-gasho barta Campus Portal eeg dhinaca hoose (dhinaca bidix) ka dibna guji qoraalka **Back to School iUpdate Now Open** ee ku qoran dhinaca hoose. (iUpdate online wuxuu sii soscon doonaa ilaa Sebteembar 9).

Haddii AADAN xasuusanin magacaaga (One Stop Stop) iyo qoraalkaaga sirta ah (password).

Haddad isicmaalayso Internet-ka: Booqo spps.org/onestop kaddibna guji badhanka Reset/Recover Your Password. Fadlan ogow: Waa in diiwaanka iskuulkaaga uu ku jiraa email-kaaga ama telefoonkaaga.

Caawinta Dhinaca Tignoolajiyada ah

- **Haddad isicmaalayso Internet-ka:** Booqo spps.org/onestop
- **Haddad isicmaalaysoTelefoon:** Marka uga horreysa la xiriir iskuulka ilmahaaga, ama wac (iUpdate Support Line) ood ka heli karto 651-744-5145.
- **Haddad isicmaalayso Email:** La xiriir qeynta caawinta ee iUpdate ood ka heli karto onestop@spps.org.

iUpdate-ka waxaa la helaa labo jeer sanadkii; Xilliga ku-noqoshada iskuulka (Luuliyo-Sebteembar) iyo Xilliga Gu'ga (Febraayo-Maajo). **Mid ka mid ah waalidka halkii qoys ayaa la rabaa inuu soo buuxiyo iUpdate-ka. Qoyska asaasiga ah ee ardaygu waa cinwaanka oo ardaygu ku noolyahay. Haddii ardaygu u baahdo inuu magaciisa si sharci ah u baddalo**, fadlan soo buuxi foomka aad ka heli karto **spps.org/changerequest** ama la xiriir Xafiiska Meelaynta Ardayda ood ka wici karto 651-632-3700.

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

FOOMKA DIIWAAN-GALINTA: Ardayda Hoy la'aanta ah (ama) aan haysanin Guri ay ku noolaadaan/lagu koriyo ama xanaaneeyo

Ardayda ay hayso hoy la'aantu waxay xaq u leeyihiin in sida ugu dhakhsaha badan loo diwaangaliyo dukumiinti la'aan iyadoo laga diwaan galinayo iskuulkii ay dhigan jireen markay hoy la'aantu ku dhacday. Si aan u aqoonsano uguna adeegno ardayda ay hoy la'aantu hayso ee degmadeena, fadlan soo buuxi macluumaadkan qarsoodiga ah ee soo socda:

Ku qor X sanduuqa ku habboon jawaabtaada "haa" ama "maya"		
1. Qoyskaygu waxay ku noolyihiin hoyga xaaladaha degdegga ah, hoyga qoysaska qaba dhibaatada ku-xadgudubka guriga ama hoyga ku-meelgaarka ah.	☐ Haa	☐ Maya
2. Qoyskaygu waxay SI KU MEELGAAR AH guri ugula noolyihiin in ka badan hal qoys, guriga guura, ama (apartment) maadaama oo qoyskayga la raray guriga, ama ay guriga ku waayeen dab ama khasaare kale.	☐ Haa	☐ Maya
3. Qoyskaygu waxay ku noolyihiin gaariga dhexdiisa, goobaha banaan ee dadweynaha	☐ Haa	☐ Maya
4. Qoyskaygu waxay ku noolyihiin hotel ama motel maadaama aysan haysanin meel kale.	☐ Haa	☐ Maya
5. Ilmaha aan ka diiwaan-galinayo iskuulka wuxuu ku noolyahay guri ku meelgaar ah wuxuuna sugayaa meelaynta daryeel korsasho.	☐ Haa	☐ Maya
6. Waxaan ahay qof dhalinyaro ah, oo aan hadda la noolayn kuna jirin masuuliyada waalid ama masuul.	☐ Haa	☐ Maya
7. Waxaan hadda la shaqeeyaa/iga-war-haya shaqaalaha Project REACH.	☐ Haa	☐ Maya

Ardayda ku nool daryeel xanaano oo ay maxkad go'aamisay, ama xeryaha kabidda dhalinyarada (juvenile corrections) waxay xaq u leeyihiin diiwaangalin deg deg ah wayna sii wadan karaan iskuulkii ay dhiganayeen xilliga lagu meeleeyay daryeelka xanaano..

Haddii aad diiwaangalinayso arday ku nool daryeel xanaano, fadlan buuxi qeybtan hoose **Ku qor X sanduuqa ku habboon jawaabtaada "haa" ama "maya"**

1. Ma waxaad diwaangalinaysaa ilmo ay maxkamadi xukuntay inuu ku noolaado daryeel xanaano oo ka-baxsan gurigooda, ama kii lagu daryeelayay? ☐ Haa ☐ Maya **Hadday jawaabtu tahay haa…**

Ardaygu xagee buu iskuul ka dhiganayey xilliga uu ku jiray meelaynta daryeelka xanaanada ee ka baxsan gurigooda?

Magaca Iskuulka _____

Haddii ardaygu ku noolyahay daryeel xanaano oo maxkamad amartay oo ka baxsan hoyga ardayga ama kii lagu korinayay:

Nooca Meelaynta: _____

County-ga Meelaynaya: : _____

Magaca Shaqaalaha County-ga: : _____

Taleefanka Shaqaalaha: _____

Haddaad ku jawaabto HAA mid ka mid ah su'aalaha kor ku qoran, waxay muujinaysaa in laga yaabo inaad u qalanto ama xaq u yeelato barnaamijka Fostering Connections ee Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul

ALL STUDENTS – RETURN TO PROJECT REACH

FOR OFFICE USE ONLY:

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

MACLUUMAADKA IYO DIIWAANGALINTA BARNAAMIJKA EDL EE FASALLADA KG-8

Fasallada 6-8

Barnaamijka Extended Day for Learning (EDL) waa barnaamij baxa saacadaha iskuulka kaddib waxaana ardayda lagu baraa maaddooyinka xisaabta, akhriska, iyo kobcinta maaddooyinka kale. Barnaamijka EDL waxaa ka baxa barnaamijyo soconaya 105 daqiiqo oo iskuulka ka diib ah usbuuciiba labo maalmood. Barnaamijka EDL waa lacag la,aan ardayduna waxay helayaan gaadiid. Marka la gaaro bisha Sebteembar ayaa qoysaska loo soo diri doonaa macluumaadka barnaamijka EDL. Haddii aad wax su'aal ah ka qabto barnaamijka EDL ee ka bixi doona iskuul gaar ah, fadlan la xiriir xafiiska iskuulka.

____ HAA, Waan danaynayaa barnaamijka EDL ____ MAYA, Ma danaynayo barnaamijka EDL

WAAXDA WAXBARASHADA KA NOOC DUWAN TAN CAADIGA AH – QIIMAYNTA TAAGEERADA DHEERAADKA AH EE WAXBARASHO: Ardayda waxaa laga yaabaa in ay u qalmaan fursado waxbarasho oo dheeri ah oo ay ka heli waaxda Department of Alternative Education (DAE). Barmaamijka EDL waxaa loogu talo galay ardayda da'ddodu ka yar tahy 21 sano ee buuxiya mid ka mid ah shuruudahaan(hoos ku xusan): * Heerkiisa waxbarasho marka lagu cabirro natiijada imtixaanaadka uu si weyn uga hooseya kan ardayda kale ee ay isku fasalka ama da'da yihiin; *Uu ka dib dhacay dhamaystirka koorsooyinka loogu talo galay ama dhibcaha lagu qalin-jabiyo; * Yahay uur ama haysto ilmo; * Lagu qiimeyay in uu daroogo adeegsado; * Iskuulka laga ceyriyay ama laga saaray; * Iskuullad degmada ay u soo gudbiyeen in laga diiwaan-galiyo barmaamijyada waxbarasho; * Yahay ilmo la kulmay xadgudub dhanka jirka ama fara xumayn; * Yahay mid ay la soo darseen xaalad caafimaad oo dhanka dhimirka ah; * Yahay mid lixdii bilood ee la soo dhaafay ay la soo daristay xaalad hoy la'aan inta aanan loo gudbinin barmaaijka; *Yahay mid luuqada ingriiska ay u tahay luuqadda labaad ama baranayo luuqada ingriiska ama; * Yahay mid iskuulka ka baxay ama ay goysmadiisu badneyd ama; * Yahay mid cudur halis ah laga daweynayo ama uu ilmo kale oo ay walaalo yihiin oo ay isku meel ku nool yihiin laga daweynayo ;

Ardaygaaga ma buuxinayaa mid ka mid ah shuruudaha kor ju xusan **Haa** ☐ **Maya** ☐

* Ardayga aanan buuxinin shuruudaha kor ku xusan wuu ka qeybqaadan karaan barmaamijka waxbarashada ee EDL.Tani waxay ku xiran tahay ujeedada degmada, baahida ardayga iyo boosaska banaan. Waxaa mudnaanta kowaad leh ardayda xaqa u yeesha adeegyada ALC. In uu aradyga u xaq-u-leeyahay gadiid iyo goobta gadiidkuba waxaa looga tix-raacayaa macluumaadka aad ku qeybta su'aalaha ku saabsan gadiidka.

Gadiidka barmaamijka Extended Day Learning (EDL). Cunugaaga guriga wuxuu :

☐ Ma Raacayo Baska

☐ Baska U Raacayaa- meesha ugu dhow cinwaanka gurigeena ee kor ku qoran ☐ Baska U raacyaa – cinwaanka day care-ka ee hoos ku qoran

Cinwaanka kala duwan ka EDL in guriga: _____

Magaca Shakhsiga _____ Telefoonka Guriga _____

RETURN TO EDL SITE ADMINISTRATOR

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

GAADIIDKA MAALIN-LAHA AH EE ISKUULKA

GAADIIDKA ARDAYDA GURYAHA KA QAADA EE ISKUULKA GEEYA CUNUGAYGA:
☐ Ma raacayo gadiidka iskuulka
☐ Wuu Raacayaa- Waxaana lagu dejinayaa boosteejada u dhow cinwaanka gurigayga kor ku xusan
☐ Wuu raacayaa: Waxaana lagu dejdinayaa cinwaanka day care-ka ee hoos ku xusan

Cinwaanka ka duwan guriga iyo dugsiga: _____

Magaca Shakhsiga _____ Telefoonka Guriga _____

GAADIIDKA MAALIN WALBO ARDAYDA KA SOO QAADO ISKUULKA EE GURYAHA GEEYO CUNUGAYGA:
☐ Ma raacayo gadiidka iskuulka
☐ Wuu Raacayaa- Waxaana lagu dejinayaa boosteejada u dhow cinwaanka gurigayga kor ku xusan ☐ Wuu raacayaa: Waxaana lagu dejdinayaa cinwaanka day care-ka ee hoos ku xusan

Cinwaanka kala duwan dugsiga iyo guriga _____

Magaca Shakhsiga _____ Telefoonka Guriga _____

FOOMKA OGGOLAANSHAHA WARBAAHINTA

Shaqaalaha Dugsiyada Dadwaynaha Saint Paul, ururada bulshada iyo xubno matalaya is-gaarsiinta ayaa laga yaabaa inay xog-waraystaan, sawiraan, ama fiidiyow ka duubaan ilmahaaga si ay ugu isticmaalaan jaraa'idka, warbixinta talefishinka, akhbaarta dadwaynaha loo soo bandhigayo iyo internet-ka. Sawirada waxaa laga yaabaa inay ka koobnaadaan koox arday ah ama ardayga kaligii, isla markaana waxaa laga yaabaa in ardayda magacyadooda la isticmaalo. Si' loo ilaaliyo xuquuqda ardayda internet-kana ay uga nabad galaan, sawirka ardayga iyo magaciisa isku mar laguma daabacayo ama ku soo wada bixi maayaan baraha internet-ka ee iskuulka ama Degmada. Waxaan kugu mahadinaynaa iskaashiga aad nala samayso si aad noogu caawiso inaan muujino shaqada wanaagsan iyo dadaalka ardaydeena iyo macalimiinteena.

Fadlan mid ka calaamadee:

- ☐ Waxaan fasaxayaa in ilmahayga la sawiro oo xog-waraysi lala yeesho; waxaa kale oo aan fasaxayaa in ilmahayga magaciisa la isticmaalo. Haddii sawirka ilmaha lagu isticmaalayo bogga interneetka ee iskuulka ama degmada, magaca kowaad ee ardayga oo kaliya ayaa la'isticmaali doonaa.
- ☐ Waxaan fasaxayaa in ilmahayga la sawiro, laakiin ma doonayo in ilmahayga magaciisa iyo sawirkiisa la isla isticmaalo
- ☐ Ma doonayo in ilmahayga la sawiro ama xog-waraysi lala yeesho, mana doonayo in magaciisa la isticmaalo.

Fadlan ogow, waa inaad soo buuxisaa foomka loo yaqaano (The Denial of Release of Directory Information) haddii aadan doonaynin in dhammaan macluumaadka ilmahaaga ku saabsan aan la daabicin, sida, magaca, sawirka, buugga sanadlaha ah, abaal marinada, barnaamijyada qalin jabinta, iwl. Si aad u diido in macluumadkan la daabaco ama la sii daayo, fadlan la xiriir Xarunta Meelaynta ee Ardayda ood ka wici karto 651-632-3760.

ANSIXINTA SANADLAHA AH EE WAALIDKA/MASUULKA EE SAFARADA WAXBARASHO (FIELD TRIPS) EE I IYO II

Inta lagu guda jiro sanad-dugsiyeedka, macallamiintu waxay qorsheeyaan safaro gaaggaban oo waxbarasho (field trips). Safarada waxbarasho ee ah nooca I iyo II waa kuwa socodka ah, waxana laga yaabaa in lug lagu maro isgoysyo halis ah. Waxaa sidoo kale ansixinta ka mid ah safarada waxbarasho ee gaadaadka loo raacayo oo laga yaabo inay qaataan wax aan ka badnayn hal maalin ama wax ka yar. Ansixintan KUMA JIRTO safarada nooca loo yaqaano III oo ah in la soo dhoxo habeenkii. **OGOW**: Oggolaansho hadal/afka ah lama aqbalayo. Haddii aan calaamadeeyo HAA, waxaan fahamsanahay in ilmahayga la siinayo diyaargarowga loo baahanyahay, islamarkaana uu jiri doono qorshe ilmaha lagu ilaalinayo ammaankooda inta ay ku jiraan safarka (field trip), islamarkaana la I soo ogaysiinayo ka hor inta aan la aadan safar kasta. Waxaa kale oon fahamsanahay inay masuuliyadayda tahay inaan iskuulka soo war galiyo haddii aanan doonaynin in ilmahaygo ka qayb galo safarada waxbarasho qaarkood.

☐ Haa, Waan oggolahay in ilmahaygu ka qaybgalo safarada waxbarasho (field trips) ee nooca I iyo II inta lagu jiro sanad-dugsiyeedka 19/20.
☐ Maya, Ma doonayo in ilmahaygu ka qaybgalo safarada waxbarasho (field trips) ee nooca I iyo II inta lagu jiro sanad-dugsiyeedka 19/20.

Magaca Waalidka/Masuulka/Ardayga Masuulka Iska-ah _____ Taariikhda _____

ALL STUDENTS – RETURN TO SCHOOL iUPDATE PROCESSOR

FOR OFFICE USE ONLY: iUpdate Processor

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

TAARIIKHDA CAAFIMAADKA

LA XIRIIR KALKAALIYAHA CAAFIMAADKA EE ISKUULKA HADDII ILMAHAAGU U BAAHANYAHAY DAWOOYIN AMA UU QABO XAALADO CAAFIMAAD OO KEENI KARA XAALADO DEGDEG AH INTA UU ISKUULKA JOOGO.

Waligaa miyuu kuu sheegay dhakhtar ama xirfadle caafimaad in ilmahaagu uu qabo mid ka mid ah xaaladahan caafimaad ee soo socda?

Neef ☐ Haa ☐ Maya Sokorow/Kaadi-macaan ☐ Haa ☐ Maya Qallal ☐ Haa ☐ Maya Qal-qaalli/Dhug-la'aan (ADHD) ☐ Haa ☐ Maya
Walaac Xanuunka Dhimirka ah ☐ Haa ☐ Maya Xasaasiyad ☐ Haa ☐ Maya

Ilmahaagu ma qaataa wax dawo ah? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii ilmahaagu qabo mid ka mid ah xaaladaha caafimaad ee kor lagu soo sheegay, fadlan faah-faahin ka bixi:

_____

_____

Fadlan noo sheeg hadday jiraan xaalado kale oo caafimaad ood walaac ka qabto si aan u ogaanno

_____

_____

_____

Magaca waalidka/Masuulka _____

Saxiixa Waalidka/Masuulka _____ Taariikhda _____

ALL STUDENTS – RETURN TO SCHOOL NURSE

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

OGGOLAANSHAHA KHARASH-CELINTA ADEEGYADA CAAFIMAAD

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay jeclaan lahaayeen inaad degmada oggolaanshe u siiso si ay kharash-celin uga dalbato kaarka caafimaadka ee ilmahaaga kaddib marka uu helo adeegyo caafimaad isagoo ku sugan iskuulka.

Macluumaad Dheeraad ah:

- Xaq ayaad u leedahay inaad diido oggolaanshahan. Haddii aad diiddo oggolaanshahan, degmadu kharash-celin kama dalbanayso kaarka caafimaadka ee ilmahaaga, macluumaadka caafimaadka ee ilmahaagana cid kale lama wadaagyso.
- Waxaa laga yaabaa in email ama boostada laguugu soo diro waraaq sharaxaysa macaashka aad heshay. Fadlan ogow, waraaqdani ma ahan biil/lacag lagaa rabo inaad bixiso, adeegani wuxuu qoyskaaga **u yahay bilaash**.
- Macluumaadka laga yaabo in lala wadaago caymiskaaga waxaa ka mid ah daweyntii lagu daweeyay, baaritaanadii la sameeyay, hawlihii iyo qorshihii daryeelka ee laguu sameeyay iyo dukumiintiyada la xiriira adeegyadii caafimaad ee laguu fidiyey.
- Marka laga reebo waxa sharcigu oggolyahay, inaad adigu fasax ku bixiso mooyee, mar kale lama soo bandhigi karo maclluudkaaga diwaanka. Waxaad dalban kartaa nuqul ah macluumaadkaaga la bandhigay.
- Xilli kasta ood doonto ayaad oggolaanshahan ka noqon kartaa adigoo qoraal soo gudbinaya wax saamayn ahna kuma yeelanayo adeega ilmahaagu helo.
- Waad diidi kartaa oggolaanshahan lagu dalbanayo kharas-celinta wax saamayn ahna kuma yeelanayo adeega ilmahaagu helo.
- Oggolaanshahani wuxuu dhaqan galayaa maalinta aad saxiixdo, wuxuuna dhacayaa hal sano kadib laga billaabo maalinta aad saxiixday.

Waxaan oggolahay oon fasaxayaa in macluumaadka ardaygayga lala wadaago caymiska caafimaad si loogu isticmaalo hawlaha ku saabsan kharash-clinta adeegyada. Macluumaadkan waxaa ka mid ah baaritaanadii la sameeyay, hawlihii iyo qorshihii daryeelka ee loo sameeyay iyo dukumiintiyada la xiriira adeegyadii caafimaad ee loo fidiyey ardaygayga. Waxaa kale oon fasaxayaa in si toos ah loo siiyo Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul kharshyada kaga baxay adeegga caafimaad ee ardaygayga ee caymisku oggolyahay.

Magaca Waalidka/Masuulka _____

Magaca Waalidka/Masuulka/Ardayga Masuulka Iska-ah _____ Taariikhda _____

Diiwaanka Ardayga iyo Xuquuqda aad Leedahay

Ogaysiis ku Saabsan Xuquuqda Xeerka FERPA Iyo Kan Dowladda Gobolka Minnesota Ee Ku Aadan Macluumaadka Ardayda Xeerka xuquuqda Qoysaska ee ku aaddan Waxbarashada Macluumaadka gaarka ah ee Ardayda ee marka la soo gaabiyo loo yaqaano FERPA iyo midka dowladda gobolka Minnesota ee ku saabsan ilaalinta macluumaadka gaarka ah ayaa waxay waalidiinta iyo ardayda ay da'dooda tahay 18 sano jir iyo wixii ka weyn siinayaan xuquuq dhowr ah oo ku saabsan daalacashada iyo wax-kabedelidda diwaanka waxbarasho ee ardayda. Xuquuqahaasi waxaa ka mid ah:

- Waalidiinta waxay xeerarkaasi siinayaan xuquuq ah in ay baari karaan oo ay dib u eegi karaan diwaanka ardaydooda 10 cisho markay ka soo wareegto maalinta ay iskuullada degmada Saint Paul ay walidkaasi ka helaan codsi uu ku doonayo diiwaankaa
- In ay waalidka ama ardayga ay xaq u leeyihiin in ay dalbadaan in diiwaanka ardayga dib loo saxo hadii uu waalidka ama ardayga ay dareemaan in diwaaanka ardayga uusan ahayn mid sax ah, mid uu ku jiro macluumaad marin habaabin ah ama wax u dhimaya xuquuqda ardayga ee ku saabsan macluumaadkiisa gaarka ah.
- In qoraal la idinku weydiisto ka hor inta uu iskuulka soo shaacinin macluumaad uu ka soo xigtay diiwaanka ardayga oo si toos ah loola xiriirin karo ama lagu garan karo ardayga, marka laga reebo ilaa xadka uu sharcigu u fasaxayo sii daynta macluumaadkaas codsi la'aan.
- Waalidka wuxuu xaq u leeyahay in dacwo ka dhan ah Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul oo ku saabsan xadgudub ku aadan xeerka FERPA uu u gudbin karo Wasaarada Tacliinta ee Dowladda Federaalka.

Ogeysiiska Diiwaanka Macluumaadka Diiwaanka Macluumaadku waa macluumaad dadweynaha u dhexeeya lana gudbin karo fasax la'aan. Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay u aqoonsantahay waxyaabaha soo socda inay yihiin macluumaad dadweyne: Magaca, Taariikhda Dhalashada, Fasalka, Iskuulka, Taariikaha Diiwaan-galinta, Abaal marinada sida qalinjabin ama shahaado dugsi sare haddii aad heshay, Waxqabad Hiwaayadeed ka baxsan manhajka. Additional information is designated as directory information for military recruiters (telephone number and address), Minnesota public libraries (telephone number, address, student ID number, student email), school resource officers (telephone number, address, parent/guardian names, class schedule), Metro Transit (student ID number), and Minnesota Office of Higher Education (students MARSS ID number and gender). Parent(s)/legal guardian(s) who wish to opt out of releasing directory information must notify Saint Paul Public Schools in writing by Sept. 30, 2019.

ALL STUDENTS – RETURN EMAIL SIGNED COPY TO Student.Wellness@spps.org, OR FAX TO 651-228-3649 (*include area code)*

FOR OFFICE USE ONLY: iUpdate Processor

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

HESHIISKA AMMAANKA EE SAYNISKA EE FASALLADA 6-8

U'jeedada

Koorsooyinka sayniska ee dugsiga dhexe waa waxyaabo gacanta laga qabanayo oo shaybaar ah. Hawlaha sayniska qaarkood waxaa ka dhalan kara waxyaabo khatar ah. Waxaan isticmaalaynaa qalab iyo xayawaano haddii sida loogu talagalay loo isticmaali waayo ay khatar ka dhalan karto. Si aan u hubinno ammaanka fasalka, waxaan diyaarinay sharciyo ama nidaamyo aan ugu magac darnay Heshiiska Ammaanka ee Sayniska. Waxaa khasab ah in sharciyadan mar kasta dhammaantood loo hogaansamo oo la raaco. Tilmaamo kale oo dheeraad ah oo dhinaca amaanka ah ayaa la bixin doonaa mar kasta oo hawl la qabanayo. **Fadlan adiga iyo ilmahaagu si wada jir ah u akhriya liistadan. Ma jiri doono arday loo oggolaan doono inuu ka qaybqaato hawlahan Sayniska ilaa uu waalidkiis/qofka masuulka ka ahi soo sixiixo heshiiskan.**

Sharciyada Ammaanka

1. Inta aad ku dhex jirto qolka sayniska waxaad u dhaqantaa si ay masuuliyad ku jirto. Lama oggola in lagu dhex ciyaaro qolka, la'isku cayrsado ama waxyaabo ciyaar-ciyaar ah la'isku cabsiiyo.
2. Dhammaan u hoggaansan tilmaamaha qoran iyo kuwa afka lagaaga sheegayaba. Haddii aadan fahmin tilmaamaha lagu siinayo, macallinkaaga weydii wixii su'aal ah eed qabto.
3. Ka taxaddar dhamaan qalabka dhalada ka samaysan iyo qalabka kaleba. Marnaba gacantaada oo maran ha ku qabanin dhalo kulul ama jaban. Taxaddar muuji mar walba ood isticmaalayso tarraq, dab, ama saxamada kulul.
4. Waxaad samaysaa oo kaliya tijaabooyinka la oggolyahay. Ha taabaanin qalabka, xayawaanka, ama waxyaabaha kale ee dhex yaalla qolka saynisaka adoon fasax ka haysanin macallinkaaga.
5. Ha cunin, xanjana ha raamsanin, ama dhadhaminin waxyaabaha yaalla qolka sayniska adoon fasax ka haysanin macallinkaaga.
6. Gacmahaaga ku dhaq biyo iyo saabbuun kaddib markaad taabato waxyaabaha kiimikada ah, xaywaanka, ama waxyaabaha kale ee yaalla qolka sayniska.
7. Marka lagugu amro/tilmaamo xiro okuyaale ama cinjirka gacmaha (gloves) markaad ku jirtaan tijaabinta walxaha. Marnaba ha iska siibin okuyaalaha inta lagu guda jiro tijaabinta walxaha qolka sayiniska dhexdiisa ah.
8. Raac tilmaamaha uu macallinkaagu ku siinayo marka la nadiifinyo ama la tuurrayo qashinka ama waxyaabaha soo hara kaddib marka la sameeyo tijaabada sayniska.
9. Haddii uu dhoco wax shil ah, wax daataan, wax jabaan, dab uu kaco, qof uu dhaawacmo, ama aad la kulanto xaalad khatar ah islamrkiiba u sheeg macallinkaaga.
10. Mar walba ka soo qaad in kiimikooyinka lagu isticmaalo qolka sayniska ay yihiin khatar. Marnaba ha taabinin, ha ursanin ama cunin kiimikada taalla qolka sayniska ilaa uu macallinkaagu si cad kuugu siiyo tilmaan inaad samayn karto sidaas.
11. Dhammaan kiimikada iyo xayawaanka ku sugan qolka sayniska ula dhaqan si naxariis leh oo taxaddar uu ku jiro. Ha furin santuuqyada ay xayawaanku ku suganyihiin adigoon fasax ka haysanin macallinkaaga.
12. Ha furin khaanadaha, ha galin qololka bakhaarada ah, ama ha qaadin kiimikada, ama qalabka, ama xayawaanada adoon fasax ka haysanin macallinkaaga.
13. Soo xiro labis ku habboon hawlaha sayniska. Hawlaha shaybaarka qaarkood waxay u baahanyihiin in timaha dheer dib-loo xiro, aanan la soo xiranin dahab iyo walxaha la midka ah oo lalmada, lana soo xirto kabo dadan/xiran, aanan la soo xiranin dhar waaweyn oo lalmada ama jaakado iyo waxyaabaha la midka ah.
14. Waa inaad barataa meelaha laga helo qalabka amaanka iyo waliba sida loo isticmaalo. Waa inaad barataa meelaha ay ku yaallaan irridaha laga baxo iyo waxa la sameeyo markay timaado xaalad degdeg ah ama dab ku saabsan.

HESHISHKA:

Waalidka ama Masuulka Qaaliga ah: Sixiixaaga ku qoran heshiiskan wuxuu ka dhiganyahay inaad adiga iyo ilmahaagu si wadajir ah u akhrideen una daalacateen Heshiiskan Ammaanka ee Sayniska (Science Safety Contract), islamarkaana aad ka war-qabto tallaabooyinka la qaadayo si loo ilaaliyo ammaanka ilmahaaga inta uu ku suganyahay qolka saynisaka

_____ Aniga iyo ardaygaygu si wadajir ah ayaan u akhrinaya heshiiskan ilmahayguna wuxuu oggolyahay inuu u hoggaansamo dhammaan shuruucda kor ku xusan

Modified from Flinn © 2017 Flinn Scientific, Inc. All Rights Reserved. Publication No. 10642 1071917

Aftida Milatariga

Ma jirtaa cid qoyskaaga ka tirsan, sida waalidkaa ama walaalkaa/walaashaa oo hadda ka tirsan ciidanka milatariga, ama ku jira ciidanka keydka, ama xilli dhow hawl-gab noqday (Army, Navy, Air Force, Marines, iyo/ama Coast Guard).

☐ Haa ☐ Maya

Hadday jawaabtu tahay haa, Dooro xiriirka idinka dhexeeya adiga iyo xubinka ciidanka ah waalid Walaalo

Qor magaca xubinka ciidanka ah_____

Dooro qeybta ciidanka ee uu ka tirsanyahay (circle one) Army Navy Ciidanka Cirka Marines Coast Guard

Iyadoo loo hoggaansamayo Qaanuunka Minnesota ee 127A.852. Si aad hesho macluumaadka Waaxda Waxbarashada ee Minnesota ee ay u baahanyihiin qoysaska ciidanka milatariga ah, booqo https://education.mn.gov/MDE/fam/mil/

iUpdate Processor

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

HESHIISKA ISTICMAALKA TIGNOOLAJIYADA EE ARDAYDA

Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul waxay ardayda siiyaan fursad u sahlaysa in ay tignoolajiyada casriga ah (technology) u adeegsadaan waxbarshada. Ardayda waxaa laga rabaa in ay raacaan ooy ilaaliyaan qawaaniinta
iyo xeerarka maamulka degmada, shuruucda kale ee wehelisa, iyo nidaamka si ay usii helaan fursada adeegsiga tignoolajiyada. Shuruucda iyo nidaamyada khuseeya hawshan waxay ku lifaaqanyihiin bartan spps.org/personalizedlearning, iyadoo waliba isla bartan laga heli karo macluumaadka ay qoysasku u baahanyihiin.

HESHIISKA ARDAYGA: Ardaydu waxay fahamsanyihiin ooy ogyihiin isticmaalka qalabka iyo tignoolajiyada degmadu inuu yahay wax ay waayi karaan. Waxaa kale oo ay fahamsanyihiin haddii ay raaci waayeen shuruudaha u yaalla isticmaalka tignoolajiyada inay ka dhalan karto in tallabo laga qaado.

ARDAYGU WUXUU NOQONAYAA QOF MAS'UUL AH

- Ardaygu, mar walba iPad-ka wuxuu ku kaydsanayaa galka uu iskuulku siiyay, wuxuuna ka dhowrayaa in uu wax ku kor qoro ama uu ku dhajiyo waraaqo iyo koollo ama (stickers). Khuseysa ardayda fasallada 6-12, ardaygu, marka uusan iPadka isticmaalaynin, wuxuu ku ridayaa boorsada iyadoo (keyboard) – kuna ku dhagganaanayo iPad-ka.
- Ardaygu, halkeeda ayuu u dhaafayaa oo ma goynayo warqada calaamadda ah ay degmada ku dhajisay iPad-ka sida qoraalka magacayga ah.
- Ardaygu, wuu xifdinayaa iPad-kiisa, wuxuuna ku nadiifinayaa ama aan ku tirtirayaa kaliya maro qalalan, wuxuuna dhigayaa meel aan aad u kululayn ama qaboobayn. ● Ardaygu, wuxuu la soconayaa oo uu ogaanayaa goobta uu iPadkiisu mar walba ku suganyahay.
- Ardaygu, uuxuu hubinayaa in mar walba baytariga iPadku kaarikaysanyahay.
- Ardaygu, wuxuu ku isticmaali doonaa iPad-kiisa nidaamka ay Degamdu u dajisay oo kaliya
- Ardaygu, tignoolajiyada uma isticmaali doono qaab uu ku dhex galo macluud aanay Dagmadu ogolayn ama aan habboonayn.
- Ardaygu, wuxuu u hoggaansamayaa shuruucda nuqul-guurinta (copyright).
- Ardaygu, uma isticmaalayo ilaha tignoolajiyada ee dagmada inuu ku khiyaameeyo imtixaanada.

ARDAYGU WUXUU NOQONAYAA QOF AMMAAN AH

- Haddii Ardaygu iPad-ka u qaato guriga, wuxuu ku ridayaa boorsadayda inta uu usii socda iskuulka ama kasoo socdo, inta uu saaranyahay baska, tareenka amaba uu joogo boostaajada. ● Ardaygu, wuxuu ilaashanayaa macluumaadka gaarka ah, oo ay ka mid yihiin magaca iyo lambarka sirta ah, lamana uu wadaagayo macluumaadkan cid kale.
- Haddii lala soo sameeyo xiriir dhinaca tignoolajiyada ah oo uu ka shakiyo, ama uu si lama filaan ah u dhex-galo baro aan munaasab ahayn, sida fiidiyow iyo sawiro, ardaygu wuxuu isla-markiiba war-galinayaa macallinka ama qof kale oo masuul ah.

ARDAYGU WUXUU NOQONAYAA QOF IXTIRAAM LEH

- Ardaygu, wuxuu isticmaalayaa luqadda ku habboon iskuulka, wuxuuna u isticmaali doonaa qalabka degmada si la oggolyahay marka uu duubayo fiidiyow ama uu sawir qaadayo.
- Ardaygu, wuxuu daalacanaayaa ama uu sii faafinayaa macluumaadka sharciga ah, runta ah, ee waliba aan dhibaato iyo af-lagaado ku ahayn dadka midabada iyo jinsiyada kala duwan.
- Ardaygu, iPad-kiisa uma isticmaalayo inuu ku hujuumo, ku dhibaateeyo, hagardaamo ku geysto, ama uu ku faafiyo been ama warbixin qaldan oo ku saabsan dadka kale.
- Ka hor inta uusan dadka sawir ka qaadin ama fiidiyow ka duubin ama uusan sii gudbinin, wuxuu weydiisanayaa fasax, marnaba kuma isticmaalaya kaameerada meelaha gaarka loo leeyahay.

MACLUUMAADKA WAALIDIINTA/MASULLIYIINTA

Apps-yada iyo Adeegyada ku dhisan baraha-interneedka: Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul waxay isticmaalaan nidaamka apps-ka iyo adeegyada ku salysan internetka oo ay ka shaqayso qolo kale, nidaamkan oo u sahalaya ardayda xiriirka khadka interneedka iyo qalabka wadashaqaynta, iyo hawlaha kale ee waxbarasho. Maamulka Dagmadu wuxuu qandaraas ku siiyay hawshan inay qabtaan dhowr shirkadood oo gacanta ku haya macluumaadkan. Macluumaadka waxaa masuul ka ah iskana leh SPPS laakiin waxaa ka shaqeeynaya qolo kale oo qandaraas lagu siiyey. SPPS waxay sidoo kale isticmaashaa apps iyo baraha internet-ka oo dheeraad ah si loo taagero qaababka waxbaridda. Barnaamijyadan qaarkood waxay u baahanyihiin in lagu galo magac/lamar sir ah si ay ardaydu usii wataan wixii ay ka shaqaynayeen saacadihii hore. Macluumaadkan gaarka ah waxay ku koobanyihiin oo kaliya magaca/lambarka sirta ah iyo shaqada uu ardaygu xilligaa gacanta ku hayo.Diwaanka apps-ka ay Degmadu ogoshahay in la isticmaalo iyo waliba siyaasadahooda asturidda macluumaadka waxaad ka heli kartaa bartan spps.org/personalizedlearning. Wixii su'aalo ah ee ku saabsan apps-yadan waxaa loo soo gudbin karaa: otl@spps.org ama 651.767.8139.

Shaandhaynta Internetka: Dagmadu waxay ardayda siinaysaa fursad ay ku heli karaan ilo waxbarasho iyagoo adeegsanaya internetka. Inta ay ardaydu ku suganyihiin goobaha Dagmadu leedahay, waxay Dagmadu isticmaalaysaa tignoolajiyad kala shaandhaysa internetka si looga baaqsado in ardaydu ay booqdaan baro aan haboonayn islamarkaana loogu hogaansamo sharciga internetka ee dhinaca caruurta ee Children's Internet Protection Act (CIPA). Inta ay ardayda banaanka ka joogaan iskuulka, waalidiinta ayaa masuul ka ah inay siiyaan tilmaamo ku saabsan isticmaalka internetka, si lamid ah sida ay u siiyaan tilmaaha ku saabsan isticmaalka talefishinka, raadiyaha, daawashada filimaanta iyo waxyaabaha kale ee aan haboonayn. Waalidiinta ayaa ka masuul ah inay ilaaliyaan lana socdaan isticmaalka internet-ka ee ilmahooda.

Xuquuqda Waalidiinta iyo Masu'uuliyiinta: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay mar kasta ooy doonaan ay fiirin karaan macluumaadka electronic-ga ah iyo email-ka ilmahooda. Waalidku wuxuu xq u leeyahay inuu codsn karo macluumaadka ilmhiisa ee ku saabsan isticmaalka tignoolajiyada. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan foomka ilmaha lagaga joojiyo isticmaalka tignoolajiyada (Opt-Out-Form) la xiriir iskuulka ilmahaaga ama booqo it.spps.org/policies/guidelines-for-acceptable-use.

☐ Saxiixaygu wuxuu caddayn u yahay inaan aniga iyo ardaygaygu dib-u-eegid ku samaynay macluumaadkan islamarkaana aan waafaqsanahay. Waxaan ilmahayga u ogaaladay inuu isticmaali karo iPad, ilaha tignoolajiyada ee degmada iyo waliba internet-ka. Waxaan sidoo kale fahamsanahay inaan wakhti kasta dib uga noqon karo fasaxan aan ilmahayga siiyay anigoo qoraal soo gudbinaya.

Magaca Waalidka/Masuulka/Ardayga Masuulka Iska-ah _____ Taariikhda _____

FOR OFFICE USE ONLY: iUpdate Processor

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

OGAYSIISKA SANAD-LAHA AH EE AHERA ASBESTOS - ANNUAL AHERA ASBESTOS NOTIFICATION

Sanadkii 1987, Xeerka Federaaliga ah Waxqabadka Degdegga ah - Federal Asbestos Hazard Emergency Response Act (AHERA) wuxuu hirgeliyey in iskuullada degmadu ay horumariyaan ayna hirgeliyaan qorshaha maareynta asbestos. Sharcigan wuxuu u baahan yahay in shaqaalaha, ardayga iyo/ama waalidkood/masuuliyiintooda sanad walba lagu wargeliyo waxqabadyada qorsheynta maamulka sida baaritaanka asbestos iyo waxqabadyada barnaamijka.

Qorshooyinka Maaraynta Dhismaha waxaa laga heli karaa Xafiiska Maamulka. AHERA wuxuu u baahan yahay qorsheyaashaas in ay helaan dadweynaha inta lagu jiro saacadaha shaqada caadiga ah ee kormeerka. Dhismo kasta wuxuu leeyahay kombiyuutar la heli karo, marka ay codsadaan shaqaalaha/dadweynaha si ay u arkaan diiwaanadan. Codsiyada nuqullada diiwaanadaas waa in loo gudbiyaa qaab warqad ama qaab elektaroonik ah Waaxda Hawlaha Caafimaadka Deegaanka & Ammaanka, oo laga wici karo 651-744-1800.

Isticmaalka Sunta Cayayaanka ee Iskuulladu - Pesticide Application at Schools

Iyada oo la raacayo Xeerka Minnesota ee §121A.30, **Isticmaalka Sunta Cayayaanka ee Iskuulladu** waxay ubaahan tahay inay sanad walba qoraal lagu ogeysiiyo waalidiinta/masuulka iyo shaqaala marka la isticmaalayo Herbicide, Pesticide, Insecticide & Fertilizer Applications.

Xeerku sidoo kale wuxuu dalbanayaa in laguu sheego saameynta caafimaadka ee muddada dheer ee carruurta uu ku yeelan karo marka la isticmaalo noocyada sunta cayayaanka ama kiimikada aan si buuxda loo fahmin.

Haddii aad jeclaan lahayd in lagu ogeysiiyo isticmaalka sunta cayayaanka ka hor maalmo aan ka ahayn kuwa lagu qeexay jadwalka la qiyaasay (marka laga reebo codsiyada deg-dega ah), fadlan la xiriir iskuulka ilmahaaga kana dalbo foom aad buuxiso. Haddii aad dirto ogaysiintan adoo adeegsanaya Boostada, fadlan ku dar shan bashqad oo shaabadaysan/aad ku dhajisay - stamp.
Haddii ay jiraan wax su'aalo ah oo ku saabsan sunta shey ku jira liiska jadwalka, Hay'adda Ilaalinta Deegaanka - Environmental Protection Agency (EPA) https://www.epa.gov/pesticides ayaad ka helaysaa kheyraad aad u fiican oo kaa caawinaya aqoonsashada noocyada sunta
Haddii ay jiraan wax su'aalo ah oo ku saabsan sunta shey ku jira liiska jadwalka, Hay'adda Ilaalinta Deegaanka (EPA) https://www.epa.gov/pesticides ayaad ka helaysaa kheyraad aad u fiican oo kaa caawinaya aqoonsashada noocyada sunta
Fadlan ogow in sharcigaani uusan wax saameyn ah ku lahayn waajibaadka waalidka / mas'uulka ama ardayga in uu u hoggaansamo sharciyada xaadiritaanka khasabka ah. Ardaydu waa inay haystaan fasax iyo cudur-daar haddii ay ka maqnaanayaan iskuulka.

SPPS NOOCA JINSIGA - SPPS GENDER

Dhamaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay haystaan aqoonsigooda jinsiga iyadoo ardayda iyo shaqaalahuna ay ku ixtiraamayaan. Tani waxaa ka mid ah isticmaalka magaca ay doorbidayaan, aqoonsigooda jinsiga, iyo helitaanka xarumaha iyo hawlaha manhajka ah / iskudhafka dheeraadka ah sida ugu habboon aqoonsiga jinsigooda.

Fadlan buuxi Magaca / Codsiga Isbadelka Jinsiga haddii aad ubaahan tahay inaad cusbooneysiiso magaca ardaygaaga ama macluumaadka jinsiga. Foomkan waxaa laga heli karaa www.spps.org/genderinclusion ama waxaad la hadli kartaa maamulaha ama la taliyahaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah

Ardayda jinsigooda ka soo guuray nooca jinsigii loo qoondeeyey markay dhasheen waxay ka faa'iideysan karaan qorshaha kala-guurka jinsiga ama qorshaha taageerada jinsiga. Tani waxay noqon kartaa mid si gaar ah waxtar u leh markaad iskuulka baddalato.

Waxaa kale oo aad codsan kartaa taageero adoo la xiriiraya Barnaamijka Out for Equity Program www.spps.org/outforequity

FASAXIDDA XOGTA ARDAYDA EE WAALIDKA – MAKTABADAHA MINNESOTA (Library GO)

Barnaamijka **Library Go** waa barnaamij/nidaam Maktabadaha Dadweynaha ee Saint Paul lagaga heli karo buugaag, muusiko, caawinta shaqada-guri ee ardayda iyo waxyaabo kale oo badan iyadoo la adeegsanayo internet-ka. Marka uu arday walba oo dhigta Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul uu leeyahay fasax uu ku gali karo macluumaadka maktabadaha dadweynaha, macallimiinta waxaa u fududaanaysa inay waxyaabo cusub oo casri ah la fal-galiyaan fasalka iyo maktabada. Dhammaan ardayda Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxaa la siiyaa lambar ay kaga qayb gali karaan barnaamijka Library Go haddii uusan waalidku diidin. Maktabadaha dadweynuhu waxay helayaan macluumaadka guud ee ardayga, cinwaanka guriga, lambarka telefoonka, lambarka ardayga (ID#) iyo emailka ardayga iyadoo macluumaadkan loogu gudbin doono si ammaan ah oo asturan. Haddii aad doonayso in ilmahaagu uusan ka qayb-galin barnaamijka Library Go, booqo www.spps.org/Domain/12029 si aad u hesho foomka diidmada iyo waliba halka aad ku soo dirayso kaddib markaad soo buuxiso. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka Library Go, booqo www.sppl.org/go.

Selections on this form will expire on August 31, 2020

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

LACAGTA CUNTADA EEN LA BIXININ

I. **U' JEEDDO**

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay aaminsanyihiin in ardayda sida wanaagsan loo nafaqeeyay ay u diyaarsanyihiin inay wax bartaan. U'jeeddada xeerkani waa in la hubiyaa in ardayda SPPS ay helaan cunno nafaqaysan oo caafimaad ah iyadoo loo soo marinayo Barnaamijka Nafaqada Carruurta, islamarkaana ay iskuullada, shaqaalaha iyo qoysasku ay isku si u fahamsanyihiin uguna xisaabtamayaan qimaha iyo kharashaadka cunnada. Xeerkani wuxuu sahlayaa in meesha laga saaro in ardayda aan iska bixin karin kharashka cunnada lagu ceebeeyo, islamarkaana la hubiyo in iskuulladu helaan kharash ay ku dabaraan barnaamijka nafaqada ardayda. II. **BIXINTA LACAGTA CUNTADA**

A. Sanad walba, qoysasku waa inay buuxiyaan Foomka Macaashka waxbarashada/Cuntada Lacag la'aanta ah ama Qiimaheeda la Dhimay.
   1. Qoysaska hela waraaq sheegaysa inay xaq u leeyihiin oo si toos ah loo aqoonsaday inay heli karaan cuntada lacag la'aanta ah ama qiimaheeda la dhimay inta ka horreysa bisha Sebteembar 1, uma baahna inay soo buuxiyaan arjiga macaashka waxbarashada.
   2. Siyaabo kala duwan ayaa qoysaska loogu diyaarin doonaa arjiyada sida in boostada ama email ahaan loogu soo diro ka hor billowga sanad-dugsiyeedka, ama in la dhigo xafiiska iskuulka, ama barta internet-ka ee Waaxda Nafaqada, ama in laga dalban karo Waaxda Cunnada.
   3. Qoysasaka u baahan in laga caawiyo buuxinta arjiga waxay la xiriiri karaan Waaxda Cunnada ama xafiiska iskuulkooda.

B. Lacag ayaa lagu shubi karaa santuuqa cunnada ee ardayga iyadoo la isticmaalayo lacag caddaan ah, jeegag ama kaararka bangiyada. Habka loo bixiyo lacagaha cunnada waxaa laga heli karaa barta internet-ka ee Waaxda Cunnada ee SPPS, ama waxaad ka ogaan kartaa xafiiska iskuulkaaga.

C. Dhammaan ardayda waxaa la siinayaa cunto iyadoon loo eegaynin in santuuqoodu maranyahay ama lacag ay ku jirto.
   1. Sharci ahaan Dagmadu kuma khasbana inay cunto siiso ardayda aan xaqa u lahayn cunmtada lacag la'aanta ah ama qiimaheeda la dhimay, islamarkaana uu maranyahay santuuqooda. Hase ahaatee, SPPS waxay aaminsanyihiin in ay ku jirto danta dhammaan bulshada iskuulladeena in arday kasta uu helo cunto nafaqaysan.
   2. Ardayda loo ansixiyey cuntada lacag la'aanta aha ama qiimaheda la dhimay ee ka diwaan-gashan barnaamijka Community Eligibility Provision, waxay helayaan cunto xitaa haddii uu santuuqoodu maranyahay ama lacag l'aan yahay.
   3. Ardayda iyagu iska bixiya lacagta cuntada oo "gacanta ku haysta lacag" iyagana waa la siinayaa cunto xitaa haddii uu santuuqoodu tusinayo in lacag lagu leeyahay.
   4. Haddii arday lacagta cuntada lagu leeyahay, jawaab-celintu waxay noqonaysaa sida lagu sharaxay qeybta hoose ee IV. Haddii uu waalidku/masuulku bixin waayo lacagaha cuntada ee lagu leeyayahy kaddib markii dhowr jeer la war-galiyay, waxaa laga yaabaa in ardayga la siiyo cunto ka nooc duwan tan caadiga ah.
   5. Cuntooyinka ka nooc duwan kuwa caadiga ah waa in ardayga lagu siiyaa meel asturan si ixtiraam ku jirana loo siiyaa.
   6. Ma jiri doono cunto si gaar ah loo dalban karo ilaa ay aradayga santuuqiisu ku jirto lacag ku filan kharashka cuntada.
   7. Marnaba ma dhici karto in arday lagala noqdo cunto la siiyay.

III. **OGEYSIINTA MARKA LACAGTA CUNTADA EE ARDAYGU DHAMAATO AMA YARAATO**

A. Marka lacagta ku jirta santuuqa ardayga ay yaraato ama dhamaato, waxaa la qaadaa tallaabooyinka soo socda si waalidka/masuulka loo ogaysiiyo:
   1. Marka uu santuuqa cuntada ee ardayda dugsiyada hoose gaaro in lagu yeesho kharash dhan labo cunto, macallinka ardayga ayaa loo sheegaa inuu akhbaar u diro waalidka/masuulka oo loogu sii dhiibo ardayga.
   2. Dhammaan ardayda SPPS:
      i. Marka uu santuuqa cuntada ee ardayda dugsiyada hoose gaaro in lagu yeesho kharash dhan shan cunto, waxaa waalidka farriin cod ah loogu diraa telefoonka.
      ii. Marka uu santuuqa cuntada ee ardayda dugsiyada hoose gaaro in lagu yeesho kharash dhan shan cunto, Xafiiska Waaxda Nafaqada ayaa waalidka u dira waraaq, iyadoon la faafinaynin laakiin si asturan oo ixtiraam ku jiro ayaa loogu diraa.
      iii. Marka uu santuuqa cuntada ee ardayda dugsiyada hoose gaaro in lagu yeesho kharash dhan toban cunto, waxaa la ogeysiiyaa maamulaha iskuulka. Shaqaalaha iskuulka ayaa la hadla waalidka ardayga si ay u qiimeeyaan baahida qoyska una caawiyaan, islamarkaana u dalbadaan in la bixiyo lacagta cuntada.

IV. **LACAGTA CUNTADA EEN LA BIXININ**

A. Dadaalka loo galayo in lagu bixiyo lacagaha cuntada ee lagu leeyahay ardayda marnaba ma fuquuqayaan mana ceebaynayaan ardayga.

B. Degmadu waxay ku dadaali doontaa inay qoysaska la xiriirto sidii loo xallin lahaa bixinta lacagaha cuntada. Qoysaska waxaa lagu dhiirri galinayaa inay soo buuxsadaan arjiga cunnada lacag la'aanta ah ama qiimaheeda la dhimay si ay ilmahoodu u helaan cunto. Qoysasak horay u buuxiyay arjiga ee uu ku yimid qoyskooda is-baddal xooggan oo dhinaca tirada sida dhalasho ilmo cusub ama is-baddal dhaqaale waa inay mar labaad soo buuxiyaan arjiga. Qoysaska ay ku adag tahay inay iska bixiyaan lacagta cuntada waxay la soo xiriiri karaan Waaxda Nafaqada si loogu sameeyo qorshe ay iskaga bixiyaan lacagta cuntada.

C. Degmadu waxay dadaal ku bixin doontaa inay soo xarayso daymaha lacagta cuntada; laakiin, marka dadaalkani keeni waayo wax natiijo ah oo uu lacagta soo xarayn waayo, daymaha waxaa dib loogu soo celiyaa iskuulka waxaana laga soo jaraa miisaaniyadda iskuulka si loogu bixiyo lacagta cuntada.

D. Degmadu marna kama qeybgalin doonto kamana dalban doonto in qof aan ka tirsanayn shaqaalaha degmada uu soo aruuriyo daymaha lacagta cuntada, sida dad samaynaya tabarucaad ama shirkadaha daymaha soo aruuriya.

V. **XEERKA KU AADDAN XIRIIRKA**

A. Xeerkan iyo dhammaan macluumaadka kale ee ka hadlaya hawshan waxaa lagu diyaarin doonaa qaab qoraal ah (sida; in lagu soo diro boostada, email, buugga back-to-school, buugga gacanqabsiga ee ardayda, tababarka shaqaalaha, iwl.) waxaana loo gudbin doonaa:
   1. Dhammaan qoysaska ka hor intuusan billaabanin sanad-dugsiyeed kasta;
   2. Ardayda iyo qoysaska u soo baddasha iskuullada dagmadeena, xilliga lagu jiro diiwaan-galinta; iyo
   3. Dhammaan shaqaalaha iskuullada ee degmada ee masuulka ka ah hawlaha diiwaangalinta.

Sidoo kale, xeerkan waxaa lagu daabici doonaa barta internet-ka ee Degmada.

FOR OFFICE USE ONLY: **iUpdate Processor**

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

2019-20 Foomka Magacaabida Jinsiyada iyo Abtirsiinta

Iskuulada waxaa looga baahan yahay inay soo sheegaan jinsiyada iyo jinsiyadda gobolka iyo Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka. Sababtoo ah isbeddelada dhowaan lagu sameeyey sharciga gobolka Minnesota, Minnesota waxay kala qaybineysaa qayb kasta oo kooxo faahfaahsan si ay u sii matalaan dadkeenna. Waalidiinta ama dadka ilmaha masuulka ka ah loogama baahna inay ka jawaabaan su'aalaha fedraaliga ah (ee adag) ee carruurtooda. Haddii aad dooratid inaadan ka jawaabin su'aalaha fedraaliga ah (sida cad), sharciga fadaraalka wuxuu u baahan yahay dugsiyada inay kuu doortaan. Tani waa xarun ugu dambaysa - waxaanu doorbidaa haddii waalidka ama mas'uulka ay buuxiyaan foomka. Su'aalaha gobolka ayaa lagu calaamadiyey "Xulasho" iyo dugsiyadu ma buuxin doonaan macluumaadkaan adiga.
Macluumaadkani wuxuu gacan ka geysanayaa hagaajinta barashada iyo barashada qofkastaba wuxuuna naga caawiyaa inaan si sax ah u aqoonsanno oo u doodno ardayda hadda aan u qalmin. Macluumaadka foomkan oo ururiya waxaa loo tixgeliyaa macluumaad gaar ah. Waxaad dib u eegi kartaa ogeysiiska qarsoodiga ah si aad wax badan uga baratid ujeedada ururinta macluumaadka, sida loo isticmaali doono oo aan loo isticmaali karin, iyo sida loo ogaado kooxaha faahfaahsan. Ogeysiiska Qarsoodiga waxaa laga heli karaa Su'aalaheena Badanaa La Is Weydiiyo: Foomka Magaca iyo Jinsiyada.

Ardaygu ma Isbaanish/Laatiin sida ay qayxeeso dawlada federaalka? Qeexida dawlada federaalka waxaa ka mid ah qofkii ka soo jeeda Kubaan, Meksikaan, Boorto Rikaan, Koonfur ama Dhexda Mareekanka, ama dhaqamada Isbaanishka kale ama asal, iyadoo loo eegaynin jinsiyada.
[Wa in aad kala doorata suaashan "ha" ama "maya".]

☐ **Haa** *[Hadii haa, fadlan ugudub su'aasha A aad.]* ☐ **Maya** *[Hadii maya, fadlan ugudub su'aasha 1aad.]*

Ikhtiyaar Su'aal A: Hadi haa, tahay jawaabta, dooro dhammaan kuwa ku taxan liiska hoos ku qoran. *(Kama jawaabi karaan shaqaalaha dugsiga):*

☐ Diid inaad sheegto ☐ Kolombiyaan ☐ Ekuwadooriyaan ☐ Guwatemaalan
☐ Meksikaan ☐ Boorto Rikaan ☐ Saalvadoriyaan ☐ Isbaanish/ Isbaanish Mareekan
☐ Isbaanish/Laatino kale ☐ Lama Garanayo

Tag su'aasha 1 aad

[Dooro haa ugu yaraan mid ka mid ah Su'aalaha (1-6) ee hoose kuwaas oo ku saabsan liiska hoose.]

Su'aasha 1: Ardaygu ma wuxuu isku aqoonsan yahay in uu yahay Hindida Mareekanka ama Asal ahaan ka soo jeeda Alaska sida uu qeexay gobolka Minnesota? Qeexidda Gobolka Minnesota waxaa ku jira shaqsiyaadka ee asal ahaan ka soo jeeda dadkii hore u degenaa Woqoyiga Mareekanka oo sii waday aqoonsiga dhaqankooda iyagoo u maraya qabaailka ama aqoonsiga beesha. [Su'aashan waa loo baahan yahay si loo xisaabiyo maalgelinta ama caawinaada gobolka.]

☐**Haa** *[Hadii haa, fadlan ugudub su'aasha 1a aad.]* ☐**Maya** *[Hadii maya, fadlan ugudub su'aasha 1aad.]*

Ikhtiyaar Su'aal 1a: Hadi haa, tahay jawaabta, dooro dhammaan kuwa ku taxan liiska hoos ku qoran. *(Kama jawaabi karaan shaqaalaha dugsiga):*

☐Diid inaad sheegto ☐ Anishinaabe/Ojibwe ☐ Cherokee ☐ Dakota/Lakota
☐ Qabaailada kale ee woqooyiga Mareekanka ☐ Lama garanayo

Tag su'aasha 2 aad.

Su'aasha 2. Ardaygu miyuu yahay Hindi Mareekan ka soo jeeda Laatiin Ameerika (ay ku jiraan wadamada Bartamaha Mareekanka)?

☐**Ha** *[Tag su'aasha 3 aad.]* ☐**Maya** *[Tag su'aasha 3 aad.]*

2019 Back to School iUpdate

Student ID: _____ Student Last Name _____ Student First Name _____ Middle Name _____ Grade ___ Birth Date _____ Current School _____

Su'aasha 3. Ardayga ma Asiyaan baa sida ay qeexayso dawlada federaalka? Qeexida federalka waxaa ka mid ah qofkii asal ka soo jeeda Bariga Fog, Koonfurta Bariga Aasiya, ama Hindiya ay ka mid yihiin wadamada Combodia, China, India, Japan, Korea, Malaysia, Pakistan, the Philippine Islands, Thailand, and Vietnam. 1

☐ **Ha** *[Tag su'aasha 3a aad.]* ☐ **Maya** *[Tag su'aasha 4 aad.]*

Ikhtiyaar Su'aal 3a: Hadi haa, tahay jawaabta, dooro dhammaan kuwa ku taxan liiska hoos ku qoran *(Kama jawaabi karaan shaqaalaha dugsiga):*

☐Diid inaad sheegto ☐ Hindi Aasiyaan ☐Burmiis ☐ Shiinees ☐ Filibiin
☐ Moong ☐ Karen ☐Kuuriyaan ☐ Fiyaatnamiis ☐Aasiyaan kale
☐Unknown

Tag su'aasha 4 aad.

Su'aasha 4. Ardayga ma madow baa ama Mareekan Afrikaan ah sida ay qayxeeso dowlada federaalka? Qeexida dawlada federalka waxaa ka mid ah qofkii ka soo jeeda asal ahaan kooxaha jinsiyada Madow ee Afrika.

☐ **Ha** *[Tag su'aasha 4a aad.]* ☐ **Maya** *[Tag su'aasha 5 aad.]*

Ikhtiyaar Su'aal 4a: Hadi haa, tahay jawaabta, dooro dhammaan kuwa ku taxan liiska hoos ku qoran. *(Kama jawaabi karaan shaqaalaha dugsiga):*

☐ Diid inaad sheegto ☐ Mareekan Afrikaan ☐ Itoobiyaan –Oromo ☐ Itoobiyaan-kale
☐ Laybeeriyaan ☐ Nayjeeriyaan ☐ Soomaali ☐ Madow Kale ☐ Lama Garanayo

Tag su'aasha 5 aad.

Su'aasha 5. Ardaygu ma Hawaiyaan Dhalad ah ama Kuwa ka soo jeeda Jasiiradaha Baasifica sida ay qeexayso dawladu federaalka? Qeexida dawlada federaalka waxaa ka mid ah dadka soo jeeda asal ahaan Hawaaii, Guam, Samowa, ama Jasiiradaha Baasifica kale.1

☐ **Ha** *[Tag su'aasha 6 aad.]* ☐ **Maya** *[Tag su'aasha 6 aad.]*

Su'aasha 6. Ardayga ma Cadaan baa sida ay qayxeeso dawalada federaalka? Qeexida dawlada federaalka waxaa ka mid ah dadka ka soo jeeda Yurub, Bariga Dhexe ama Woqooyiga Afrika.1

☐ **Ha** ☐ **Maya**

Magaaca Waalidka/Masuulka _____Tariikh _____

Saxiix Waalidka/Masuulka _____

FOR OFFICE USE ONLY: iUpdate Processor